



PORTLAND PUBLIC SCHOOLS

REOPEN

Golaha Waxbarashada PPS Waxa ay Ansixiyeen Qorshaha: Waxbarashada Iskudhafan oo Bilaabmi Doonta bisha Abriil

Maarso 18, 2021

Qoysaska iyo Shaqaalaha PPS ee Qaaliga ah,

Waxaan ku faraxsanahay inaan idinla wadaagno in caawa Golaha Waxbarashadu ansixiyeen heshiis dhexmarary Dugsiyada Dadweynaha Portland iyo Ururka Macallimiinta Portland, kaasi oo wada u xaadhay in Dugsiyada Dadweynaha Portland(PPS) ay bilowdo Waxbarashada Iskudhafan ee Fasalka Gudihisa ay Ardaydu ku qaadan doonaan, iskuuladu waxa ay bilaabi doonaan bisha Abriil 1deeda iyo 2deeda laga bilaabo Xannanada Waqtiga Hore ilaa fasalka koowaad, Fasalada 2 ilaa 5 waxa ay bilaabi doonaa bisha Abriil 5teeda; fasalada 6aad ilaa 12naad waxay waxbarashada iskudhafan bilaabi doonaa todobaad bish Abriil 19keeda.

Ansixinta Golugu waxa ay timid markii la isla ogolaaday heshiiska xubnaha PAT.

Aqlabiyada qoysaskeenu waxa ay muujiyeen inay diyaar u yihiin in ardaydoodu qaataan waxbarashada ardaygu fasalka gudihisa ku qaadanayo, iyada oo muddo bilooyin ah ku mashquulsaneyn sidii aan ugu diyaargarooobi lahayn inay ay ardaydu iskuuladeenii ku soo noqdaan iyaga oo nabadqaba. Waxa aan ku faraxsanahay inaan si degdeg ah u bilaabeyno waxbarashada iskudhafan!

Waxa aan sii wadi doonaan inaan idinla wadaagno faahfaahin maalmaha soo socda ku saabsan sida loo furayo. Waxaan sidoo kale idinku martiqaadeynaa inaad booqataa [Bogga shabakada Dib u furida.](#)

Mahadsanid.